

Xaashida Xaqiiqda COVID-19 Fahmida sida tallaalada kala duwan ee COVID-19 ay u shaqeeyaan

Talaalka COVID-19 waxa uu gacan ka gaysan karaa helida difaaca SARS-CoV-2, fayraska keena COVID-19, iyada oo aan la xanuunsan. Sadex talaal ayaa loo ogolaaday in xaalada degdegga ah loo isticmaalo Maraykanka oo ay heli karaan dadka reer Ohio ee u qalma. Sidee ayay u shaqeeyaan noocyada kala duwan ee talaalka COVID-19? Sidee ayay isku mid u yihiin? Siday u kala duwan yihiin? Miyaa dhamaan [amaan yihiin oo wax ku ool yihiin](#)? Waa kuwan waxay tahay in laga ogaado talaalada.

Talaalada COVID-19: Macluumaad Degdeg ah

	Pfizer-BioNTech	Moderna	Johnson & Johnson (Janssen)
Taariikhda la ogolaaday	Diseembar 11, 2020	Diseembar 18, 2020	Febraayo 27, 2021
Nooca talaalka	Messenger RNA (mRNA)	Messenger RNA (mRNA)	Viral vector
Xadiga	Laba talaal, oo 21 maalmood u dhaxeeyaan	Laba talaal, oo 28 maalmood u dhaxeeyaan	Talaal kaliya
Da'aha	16 iyo wixii ka wayn	18 iyo wixii ka wayn	18 iyo wixii ka wayn
Macluumaadka waxku oolnimada tijaabada caafimaadka	95% ayuu wax ka taraa kahortaga xanuunka COVID-19 ee shaybaadhka lagu xaqiijiyay marka ay dadku qaataan labada jeerba talaalka.	94% ayuu wax ka taraa kahortaga xanuunka COVID-19 ee shaybaadhka lagu xaqiijiyay marka ay dadku qaataan labada jeerba talaalka.	Waxa uu si dhamaystiran uga hortagaa dhigitaanka isbitaalka iyo dhimashada, 85% waxa uu baajiyaa xanuunka daran ee COVID-19, 72% waxa uu wax ka taray Maraykanka (66% guud ahaan) kahortaga xanuunka dhexe ilaa daran ee COVID-19.
Saamaynta caafimaad daro	Damqasho meesha la iska muday, daal, madax xanuun, murqo xanuun, laalabatooyinka oo ku xanuuna, xumad. Saamaynta caafimaad daradu badanaa waxay timaadaa marka talaalka labaad la qaato. Jawaab celinta xasaasiyada aadka u daran (anaphylaxis) way yar tahay.	Damqasho meesha la iska muday, daal, madax xanuun, murqo xanuun, laalabatooyinka oo ku xanuuna, xumad. Saamaynta caafimaad daradu badanaa waxay timaadaa marka talaalka labaad la qaato. Jawaab celinta xasaasiyada aadka u daran (anaphylaxis) way yar tahay.	Damqasho meesha lagaa muday, madax xanuun, daal, iyo murqo xanuun. Yalaalugo iyo xumada oo aan sidaa caam u ahayn. Talaalka lalama xidhiidhin jawaab celinta anaphylactic.
Xaashida macluumaadka	Xaashida macluumaadka Pfizer-BioNTech EUA	Xaashida macluumaadka Moderna EUA	Xaashida macluumaadka Janssen EUA

Sidee talaalka loogu qaybinayaa Ohio?

In kasta oo uu weli yar yahay talaalku, shakhsiyaadka qaadanaaya talaalka COVID-19 waxay u badan tahay in aan la siinin ikhtiyaarka talaalka ay doonayaan inay qaataan.

Talaalka laga heli karo goobta talaalka ee gaarka ah ama xarunta caafimaadka ayuu qofku qaadan doonaa. In la qaato talaalka ugu horeeya ee la heli karo waxa ay kaa caawinaysaa inaad ka hesho amaan COVID-19.

Dhamaan sadexda tallaalada COVID-19 waxa la caddeeyey inay nabdoon yihiin oo ay waxtar u leeyihiin ka hortagga xanuun khatar ah, isbitaal dhigis, iyo u dhimasho xanuunka COVID-19.

Noocyada kala duwan ee talaalada

Talaalada ayaa ah difaaceena ugu wanaagsan ee kahortaga xanuunka daran ee COVID-19. Talaalku waxa uu keenaa jawaabo difaaca ah si markaa uu jidhku u xasuusnaado sida uu ula dagaalamayo fayraska mustaqbalka.

Maraykanka Talaalada COVID-19 waxay u shaqeeyaan siyaabo kala duwan, laakiin dhamaan waxay adeegsadaan borootiinta dusha ee aan waxyeelada lahayn ee fayraska SARS-COV-2, kaas oo keena COVID-19, si loo dhiso difaaca.

Borootiinta sare (ama spike proteins) waxa uu ku dhijiyaa fayraska unuga, taas oo u sahlaysa fayraska inuu galo unugyadan. Spike protein laftiisa ayaan waxba dhimin, oo u isticmaalka talaalka kaliya waxa uu baraa jidhkaaga sida uu u aqoonsanayo borootiintaas, iyo sida uu ula dagaalamayo mustaqbalka.

Talaalada Messenger RNA (mRNA)

[Talaalada Messenger RNA \(mRNA\)](#) waxa ay adeegsadaan waxyaabo dabiici ah oo loo yaqaan [mRNA](#) si ay u siiyaan koodhka hidde-sidaha unugyada si ugu sameeyo oogada ama spike protein-ka fayraska SARS-CoV-2. Borootiinta lagu sameeyay qaabka mRNA waxay kiciyaan nidaamka difaaca, iyadoo baraa inuu u arko spike protein inuu yahay duulaan, oo uu sameeyo antibodhi la dagaalama. Waxa uu bartaa jidhku sida uu isaga difaaci lahaa caabuqa mustaqbalka.

Teknooloojiyadan talaalka waxaa isticmaala labada talaal ee [Pfizer-BioNTech](#) iyo [Moderna](#). In kasta oo talaalada mRNA ay cusub yihiin, cilmi baadhayaashu waxay daraasadaynayaan oo ay ka shaqaynayaan talaalada mRNA mudo tobanaan sano ah. Waxa hore loogu daraasadaynayay hargabka, Zika, iyo xanuunka xayawaanka ee raabay (rabies), tusaale ahaan. Marka laga tago talaalada, cilmi baadhida kansarka ayaa isticmaasha mRNA si ay u kiciso nidaamka difaaca si loogu bartilmaameedsado unugyo kansar leh oo gaarka ah.

Talaalada viral vector

Talaalka [viral vector](#) waxa uu isticmaalaa qayb wax laga badalay oo duwan oo fayraska ah si uu u siiyo tilmaamo unugyada si ay u sameeyaan nuqulada spike protein oogada. Fayras aan waxyeelo lahayn oo aan firfircoonayn, sida ka keena hargabka caadiga ah, ayaa loo isticmaalaa vector (ama aalada qaaditaanka) si loo bixiyo tilmaamaha samaynta spike protein-ka. Nidaamka difaaca ayaa kadibna aqoonsada in borootiintan ayna halkaas lahayn, oo markaa bilaaba inuu la dagaalamo. Waxa ay bartaa jidhka sida uu isaga difaaci lahaa caabuqa mustaqbalka.

Teknooloojiyadan waxaa loo adeegsadaa talaalka [Johnson & Johnson \(Janssen\)](#). Saynisyahanada ayaa bilaabay inay abuuraan viral vectors 1970-naadkii. Marka laga tago u isticmaalka talaalada, sida hargabka iyo RSV, viral vectors sidoo kale waxaa lagu daraasadaynayay daawaynta hidde-sidaha, lagu daweyo kansarka, iyo daraasada molokulaar bayolojiiga. Talaalada isticmaala teknooloojiyadan waxaa la isticmaalay mudadii safmarka Ebola.

Sidee loo ogaadaa in talaalku amaan iyo wax ku ool yahay?

Amaanka talaalada COVID-19 waxaa si dhaw ula socota Xarumaha Kahortaga iyo Xakamaynta Xanuunada (Centers for Disease Control and Prevention, CDC) iyo Maamulka Maraykanka ee Cuntada iyo Raashinka (U.S. Food and Drug Administration, FDA).

FDA waxay ogolaan kartaa [isticmaalka xaalada degdegga ah \(emergency use authorization, EUA\)](#) si dhakhso loogu heli karo waxsoosaar caafimaad inta lagu jiro xaalada caafimaad ee degdegga ah sida safmarka COVID-19. FDA waxay isticmaashaa heerar adag iyo aragtiyada xirfadlayaasha caafimaadka madaxa banaan si ay u qiimayso dhamaan macluumaadka la heli karo si loo xaqiijiyo in talaalku uu amaan yahay oo uu wax ku ool yahay, oo faa'idiisu ay ka badan tahay khatartiisa. Kadib markii ay FDA go'aamisay, CDC waxay sidoo kale qiimaysay macluumaadka la hayo kahor inta ayna taladii ugu danbaysay ee isticmaalka talaalka soo saarin. Nidaamyada [la socodka amaanka talaalka](#) ayaa hirgeli doona marka talaalka la isticmaalo.

Macluumaadka:

- [Talaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech ee EUA](#)
- [Talaalka COVID-19 ee Moderna ee EUA](#)
- [Talaalka Johnson & Johnson \(Janssen\) ee EUA](#)

Fahanka waxtarka talaalka ee tijaabada caafimaadka

Waxay u badan tahay inaad maqashay heerarka wax ku oolnimada talaalka COVID-19. Laakiin maxay lambaradani ka dhigan yihiin? [Wax ku oolnimada talaalka](#) waxaa weeye boqolkiiba inta uu yareeyay xanuunka marka la eego koox dad ah oo qaatay talaalka tijaabada ah marka loo eego kooxda dadka ah ee aan qaadan talaalka ee ku jira daraasada. Tusaale ahaan, heerka waxtarka 85% waxa uu ka dhigan yahay in dadka la talaalay ay ka khatar yar yihiin 85% inay yeeshaan xanuunka COVID-19 ee aadka u daran marka loo eego dadka kale ee ka qayb galaya ee aan qaadan talaalka.

Isbarbar dhiga heerarka wax ku oolnimada sadexda talaalka ee COVID-19 waxaa uu leeyahay caqabad maadaama oo ay jiraan kala duwanaanshe nashqadaha iyo wakhtiga Wajiga 3 ee tijaabada caafimaadka. Tijaabooyinka waxaa loo tijaabinayay natiijooyin kala duwan in la helo, talaalada midba midka kale laguma tijaabin, oo dhammaantoodna laguma tijaabin [noocyada cusub ee fayraska](#). Isbarbar dhigu maaha sida laba tufaax oo la isku barbar dhigayo oo kale.

- Tijaabooyinka [Pfizer](#) iyo [Moderna](#) waxaa labada lagu tijaabiyay sidii loo go'aamin lahaa hadii talaalka uu kahor tagayo wixii astaamo caabuqa COVID-19 ah.
- [Tijaabooyinka Janssen](#) waxaa loo sameeyey si loo go'aamiyo hadii talaalku uu kahor tagayo xanuunada COVID-19 ee dhexe ilaa daran, oo lagu qeexay isku darka shaybaadhka qofka lagaga helo iyo ugu yaraan hal astaan.
- Talaalada Pfizer iyo Moderna waxaa sidoo kale lagu tijaabiyay isla wakhtigaan kahor [inta ayna soo bixin noocyada cusub](#) Ingiriiska, Koonfur Afrika, iyo Baraasiil. Lama hubo sida ay wax uga tarayaan noocyadan kale ee fayraska, in kasta oo daraasada hordhaca ah ay muujinayso in talaalku weli uu bixiyo badbaadin. Talaalka J&J ayaa wakhti dambe la tijaabiyay markii noocyada cusub ay soo baxayeen, oo guud ahaan kiisaska cusub ayaa aad u badnaa.

Nuxurku waxaa weeye in dhamaan sadexdan talaal ay kaa ilaaliyaan xanuunka daran, oo ay kamid tahay dhigitaanka isbitaalka iyo dhimashada.

Waxaa la sameeyay Febraayo 28, 2021.

Macluumaad dheeraad ah, booqo coronavirus.ohio.gov. Wixii jawaabaha su'aalaha COVID-19 ah, la hadal 1-833-4-ASK-ODH (1-833-427-5634) ama iimeel u dir COVIDVACCINE@odh.ohio.gov.

Caafimaadkaaga maskaxdu wuxuu muhiim u yahay sida caafimaadka jirkaaga. Haddii adiga ama ehelkaagu aad waajahaysaan walaac la xiriira aafada koronafayras, caawimo ayaa diyaar ah 24 saac maalintii, toddobada maalmood toddobaadkii. Wac COVID-19 CareLine 1-800-720-9616.